Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay : https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Luulyo 9, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Sharci-dejinta Miisaaniyada 2021-23

Farriintani waxay bixinaysaa macluumaad cusub oo kooban oo ku saabsan miisaaniyada 2021-23 iyo sharciga loogu talagalay ODDS.

Agaasimaha Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) Fariborz Pakseresht ayaa soo saaray farriin soo koobaysa miisaaniyada guud ee DHS, taasi oo ku jirta farriintan.

Miisaaniyada sida sharci ahaan loo ansixiyay ee 2021-23 waxay Dhaqaale Guud oo dhan $1.24 billion u qoondeysay ODDS. Qoondayntani waxay qiyaastii boqolkiiba 20 ka sarreysaa miisaaniyada sida sharci ahaanta ah loo ansixiyay (LAB) ee 2019-21 iyo kororka in ka badan boqolkiiba 10 ee heerarka adeega waqtigan la joogo ee 2021-23 (CSL) ee dhanka wadarta lacagaha.

Farriin faahfaahsan oo ku saabsan heerarka lacageed ayaa soo baxay Juun 28. Intaasi waxaa dheer in heerarka lacageed ee cusub ee loogu talagalay daryeel bixiyayaasha, maalgelinta dheeraadka ah ee la sameeyay 2021-23 ay ku jiraan:

- **Kala duwanaanshaha, sinnaanta iyo ka mid noqoshada**: In ka badan $1 milyan oo ah maalgelin lagu yareynayo ama meesha looga saarayo caqabada dhanka helitaanka luqadda iyo kordhinta wada xiriirka loogu talagalay dadka qaba I/DD iyo qoysaska.

- **Ruqsad siinta shaqaalaha**: Maalgelinta iyo maamulka boosaska shaqo oo loogu talagalay 19 boos oo ka tirsan kooxda Ruqsad bixinta iyo Wanaajinta Tayada si loo buuxiyo baahiyaha loo qabo xaddiga shaqo iyo xaqiijinta in Oregon buuxinayso waqtiyada loo qabtay federaalka ee loogu talagalay ruqsad bixinta booqashooyinka iyo baaritaanada dhanka dayacaada xadgudubka.
- **Nidaamyo Isku xira Qoys ilaa Qoys kale**. Wuxuu bixiyaa $1.4 milyan oo ah Dhaqaalaha Guud si barnaamijkani dib loogu soo celiyo heerkii maalgelinta ee uu taagnaa 2019-21, iyada oo la waafajiyay sicir bararka.
- **Daraasada Qaabka Maalgelinta CDDP**. Waxaa lagu bixiyaa maalgelin loogu talagalay ODDS si qandaraas loo galo loogu talagalay daraasad wax lagu aqoonsanayo, iyo soo jeedinta talooyin la xiriira, qaabka maalgelinta oo la wanaajiyay oo loogu talagalay Barnaamijka Naafanimada Korriinka Bulshada (CDDP).
- Oggolaanshaha qorshaha ODDS oo loogu talagalay **boqolkiiba 10 oo ah maalgelinta federaalka oo kor loo qaaday** oo ka socda Xeerka Qorshaha Samata-bixinta Maraykanka.

Sharciyada ay soo bandhigtay ODDS ee la ansixiyay intii lagu jiray fadhiga waxaa ka mid ah:

- HB 2105: Wuxuu dugsiyada degmada uga baahan yahay in ay carruurta iyo waalidiinta siiyaan macluumaad, tababar, iyo ilo la xiriira go'aan gaarida la taageero marka la joogo kulamada Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP). Go'aan gaarida-la taageero wuxuu dadka naafada ah u saamaxaa in ay doortaan dad kale oo lagu kalsoon yahay, oo inta badan ah xubno ka tirsan qoyska, si looga taageero iyaga gaarista go'aano u gaar ah.
- SB 86: Wuxuu Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka siiyaa awooda tixgelinta waxqabadka adeeg bixiye ama hay'ada daryeelka bixisa ee ka hawl galay barnaamij ama goob ku taala gobol kale oo ka baxsan Oregon iyada oo la isku toosinayo luqadda sharci ee loogu talagalay guryaha iyo xarumaha tababarka ee la degan yahay iyo xarumaha si loo waafajiyo sharciga guryaha daryeelka dadka waayeelka ah.
- SB 88: Wuxuu saxayaa tixraacyada shaqooyinka Barnaamijka Naafanimada Korriinka Bulshada (CDDP) qaarkood oo ka socda ORS 430.664 ilaa ORS 430.662 oo si aan sax ahayn loo sameeyay ansixintii SB 20 intii lagu jiray kulankii sharci dejinta ee 2019-kii.
- SB 89: Intii lagu jiray kulankii 2017, Sharciga Senate-ka ee 243 wuxuu ballaariyay qeexitaanka Ilmaha ku jira Daryeelka "Child in Care" si loogu daro carruurta degan guri ilmaha lagu korsado iyo

xarunta la degan yahay ee naafanimada korriinka. SB 89 wuxuu kala caddeynayaa in xarumaha la degan yahay ee naafanimada korriinka loola jeedo carruurta da'doodu yahay 17 sano ama ka yar.
- SB 90: Wuxuu ilaaliyaa in cinwaanada dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka ee degan guryaha daryeelka dadka waayeelka ah, guryaha iyo xarumaha tababarka ee la degan yahay la shaaciyo iyada oo la raacayo codsiga diiwaanka dadweynaha marka laga reebo shaacinta oo ah mid dan u ah bulshada.

Miisaaniyadani iyo sharciyadani waxay naga caawin doonaan in aan sii wadno shaqadeena la isku waafajinayo adeegyadeena ku aadan hadafkeena ah lahaanshaha nidaam qofka ku saleysan.

Waad mahadsan tihiin dhammaantiin wax u doodistiina iyo taageeradiina dadka reer Oregon ee qaba naafanimada maskaxda ama korriinka.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.